
Mid kamid ah sheekooyinka ugu akhriska badan

★★★★★



CEELKII GALAADI

" Sooyaalka waa tixraaca mustaqbalka dhaw. Qormadan waa qayb kamid ah Sooyalka Soomalida iyo halgankii dhabta ahaa "

CABDULLAHI CABDIKAAFI CABDI

Nin aqdaamo ferenjiya maantiyo abuurriin Ama aaladduu sida ama

awrtabuu rara Ama ariga buu qala ama laba ugaarsada

Ama uba ilaalaa ama uurka kala jira Ashahaado beeniyo

islaannimo ha lagu dhaqo Ilaahayna nama oron anna ma oggolaan karo!

Sayyid Maxamed Cabdulle Xasan

Aniga iyo Ceelka

Cadceeda aad uma kulula oo cirka waa uu daruuraysan yahay, dhagahayguna waxaa kusoo dhacaya dhawaaqa codadka kala duwan ee shimbaraha, iyo kadlaha faraska aan fuushanahay oo la yiraahdo “Qawl”, faraskan Qawl bullaale waxaa 1901-dii abaal marin ahaan ii siiyey Sayyidka kadib guushii Eebe weyne ina gudoonsiiyey iyo maalintii wacdaraha badneed ee Firdhidin.Waxa la oran jiray ”Qawl” oo waxa lahaa mid kamid ah ragii daraawiisheed balse ku shahiiday dagaalkaas, Sayyidkuna asaga oo ixtiraamaya Darwiishkii shahiiday ayuu igu yiri “Qawl waa kugu amaano”, intaa kadibna aniga ayaa la wareegay kuna daray magaca Bullaale maadaama uu ahaa faras cad laakiin caddaankiisa uu ku jiro dambari , timihiisa iyo minjihiisuna madow yihiin, sidaas ayaa ugu magac bixiyey ” Qawl Bullaale ”. Waxa kale oo ii raran rati dhaan ah oo aan rabo inaan reerka biyo ugu soo dhaamiyo .Halkii satimaanba marbaan ceelkan usoo dhaan tagaa si aan reerka uga biyo tiro xoolahana aan uga waraabiyo, dhulka badankii wa qoyan yahay oo roobab mahiigaan ah ayaa ku dul joogsaday, cagaarkana wuu is haystaa tan iyo il qabadka. Deegaanka waa Galaadi oo loogu magacdaray ceelkan ku yiil oo la yiraahdo ceelka Gelaadi. Dadku waa wada xoolo dhaqato siduu kolkiisa horeba ahaa balse waa jiraan xoogga beraley ah oo galbeed naga xiga. Qolo walba hawshiisa duni ayaa cuslaysay oo ummadu hawlahooda ayey kuwada jeedaan. Macaanka jawiga dartii iyo qoyaanka hawada hadba waa aan gamaayoonayaa oo madaxeygu dhinac buu hadba iyo jeer u liicayaa, markii aan luloodaba waxa dhagahaygu ka dhawaaqa codka isku dhaca haamaha maran ee ratiga ku raran, hadana waa anigoo oo mar kale hurdo boobay.Waxa ii joogta shan wiil oo dhawr iyo labaatan gu´ jira ayaga ayaa badankood hawlaha

reerka qabta haday noqoto waraabinta iyo raacida xoolaha ama hawlaha kale ay reerku u baahan yihiin. Taas waxa ay isiisay fursad ah inuu socdaalkeyga bato oo aan u safro inta u dhaxeesa nugaal iyo bari anoo badeecad wada, badankood badeecadeydu waxa ku furi jiray caluula oo ahayd meel ganacsi wanaagsan leh. Balse haatan muddo shan Sanno ah ayaa laga joogaa kolkii aan ku biiray dhaqdhaqaaqii darawiisheed ee Sayyid Maxamed uu hogaaminayey, shaqadii ganacsiguna waxa ii badashay Darwiishnimo oo waligeeyba waxa ku taamayey mar un in gaalkan aan kaga cago-bixiyo dhulkagaya. 1887dii ayey ahayd goortaan la kulmay niman aan xidid nahay kana tirsan Daraawiish, waxay igula taliyeen inaan kusoo biiro dhaqdhaqaaqa. Xasan Cawl oo aan ilmo habreed ahayn ayaa ku carabaabay “ Calow manta col uga baqi meysid caruur iyo xaas, ciilna waxa noogu filan calanka gaalka ee dhulkagaya ka babanaya”.

Run ahaantii Xasan Cawl aad ayuu uga war qabay qaabkey wax uga socdaan Berbera iyo Waqooyi, waayo asaga ayaa kusoo barbaaray degaankaas oo mid kamid adeeradii ayaa askari cadaan ahi ku dilay Berbera kadib muran ka dhashay canshuur laga rabay inuu bixiyo oo uu diiday. Haa, waliba haa ; canshuur darteed ayuu naftiisa ku waayey, maxaan ku tilmaami karnaa gardarada intaa la´eg qof dhulkiisa loogu yimid oo misana lagu dilay.

Ku biiristeydii dhaqdhaqaaqa waxa marar badan la kulmay hogaamiyaashii Daraawiisheed oo badankood iga xogaal weeydiin jiray dhulka aan ku noolahay iyo dadka siday ugu baraarugsan yihiin halka uu halganka marayo. Shaqada ugu badan aan markaa u qaban jiray Daraawiish waxay ahayd inaan hadba soo indho-indheeyo dhulalka ciideed iyo waxa kasocda kadibna aan ku warceliyo xeerooyinka ciidanka. Marar badan ayaa warbixino aad u tun weyn soo tabiyey, waxa aan aad uga qayb qaaatay dagaaladii firdhidin iyo beer-dhiga oo kol horre Ingiriis afka ciida loo daray. Balse jawigu waa uu ka duwanaa goortan oo Ingiriis dhawr guluf oo hore oo looga adkaaday ayuu caro kala kulmay saraakiishii joogtay Landhan ee u qaabilsanayd dagaalka, waxay ayna sameeyeen dhaqdhaqaaq aad u badan ayagoo ciidamo badan kasoo daabulay dhulalkii uu gumaysan jiray, haba ugu badnaadaan ciidamado laga kala keenay: Kiinya, Hindiya, Koonfur Afrika iyo meelo kale uu asagu xoog ku hasytay. Qof walba waa uu ku baraarugsanaa inuu dagaal soo wajahan yahay balse lama ogsooneen goorta iyo meesha la isku haleeli doono.

Si kadis ah ayaan usoo baraarugay anigo oo faraskaygii Qawl saaran, isla markiina waxa ogaaday in gamaanyadii ay ila tagtay oo aan riyo aan badneen kasoo booday, wax yar marka aan socdayba waxa aan soo gaaaray goobtii uu ku yaalay ceelka. Waxa meel aan dheereen iga muuqday dhawr nin oo ceelkii Galaadi dul taagan. Ceelkan muddo aad u dheer ayaa dhaanka laga dhaansanayey oo dirir badan ayaa dhacay waraabka dartii, rag badan iyo xoolo badan ayaa lagu kala furtay ceelkan dartii maasooyin badan ayaa qormay, balse haatan dhulka waa nabad oo dadku waa heshiis ceelkana hadba qofkii kusoo hormara ayaa dhaanka iska leh inta kalena waa ay sugtaa si uu uga bogto hawlihiisa.Markaan soo dul istaagay ceelka waxa isla markiiba gartay ragii dhaanka watay, waxa aan ka gartay nin seedigay ah oo la yiraahdo Qaaje Maxmed Ciise oo loogu yeeri jiray “Qaaje Balas”, waxa ayna ilmo adeer ahaayeen marwadeyda oo la oran jiray Xareedo Aw- Jaamac. Salaan dheer kadib waxa aan weydiiyay waxa maanta ragii nugaaleed dhulkan cideed keenay ma abaar mise colaad misana waxa niyadeeda kusoo dhacday inuu Qaaje iyo labo ragoodo oo ciid ka ceel cabaya aysan colaad maahee wax kale usocon. Qaaje dhawr sanno kahor ayaa dhulka ciid ugu danbeesay kadib guluf dhexmaray isaga iyo nin kaloo Darwiish ahaa markaas isku haystay aanooyin horre.

Anoo raba inaa ka salgaaro waxa raggaan meesha keenay ayaa Qaaje intuu hadalkii boobay igu yiri “Calow ceelka dhaanso si dhaqsi lehna uga caraab ceelka waxa laga yaabaa in meeshan col soo maree”. Run ahaantii hadalkii Qaaje waxa uu sii kordhiyey dareenkeygii ku aadanaa in Ingiriis uu soo garay carradan asaga oo baadi goobaya Darawiish, waxa kale hadalkeygii sii rumeeyey markaan arkay hubka ay wateen Qaaje iyo ragii lasocday iyo qoryaha Shan-Gaabka ee usuran garabka iyo carcartanka dagaal ee ragan ka guuxaya. Dhaankeygii ayaa iska bilowday raagiina waa sii sheekeesanay, hase ahaatee Qaaje waa uu lasocday in aan Darawiish ahay oo aan dhawr dagaal ka qayb qaatay sidaa darteed hadalka iyo xoogta aad iima uusan siinayn oo wuxu islahaa ninkan waaba raga aad u socotaan. Sheeko iyo kaftan dheer kadib casar liiqii ayaa ka caraabay halkii uu ceelka ku yaal waxa aana cagta saaray wadadii hoygeygii i geen lahayd. Wax aan socdaba waxa subixii danbe soo gaaray aqalkeeygii oo waxa iga horyimid inankaygii weynaa waxa u tilmaamay inuu ratiga dhaanka ka dejiyo faraskana daaq geeyo.

Aqalkeygii ayaan soo galay oo gogol ayey ii sii diyaarisay marwadeyda, daal iyo safar dheer kadib waxa isku kala bixiyey hurdo aad moodo inaan dhawr bilood hayaan ahaa balse waxa taas iiga sii darnaatay, gortii aan hurdo gama´ gaaray ayaa waxaa arkay riyo aad iiga yaabisay taasoo ahayd inaan riyada ku dhex arkay anoo dhex taagaan goob aad moodo inuu guluf ba´an kasocdo dhiig waxa qubanayo iyo rag waxa dhulka yaal aanan qiyaas lahayn. Haba kasii darnaatee waxa dareemayaa inaan aqoon u leeyahay meydadka meesha yiil oo qaarkood waxay ay ila muuqdeen ragii daraawiisheed aan is naqiin, goobtanana waxa ku hardamaya kolonyo ciidan ah oo qaarkood ay niman cadaana ay horboodayaan, dhinac kalaan fiiriyey mise waxa daadsan dhawr shimbirka haadka loo yaqaan oo cunaya meydad meesha looga tagay anoo shimbirkii ku maqan ayaan maqlay sawaxan dhinacayga kasoo yeeraya mise waa nin aad moodo inuu suurad Soomaali ah leeyahay kasoo igula soo ordaya seef galka ka baxsan. Hurdadii dheereed ayaa kabooday sidii nin gamuun lala helay camal, waxa aan isku qaaday dhinacii daarada reerka anigoo u dhawaaqaya wiilkeygii weynaa, “ War Xasanow Qawl xakamaha u diyaari ”, gadaashay waxa taagneed marwadeyda Xareedo oo inta ay yaabtay tiri “ Xagee usocota xiligan habeenka ah”. Markaas ayaa ugu jawaabay “Xareedo amaanadii Sayyidka ayaan u socdaa”. Waxa isla markiiba dafay qorigaygii shan-gaabka ahaa iyo wixii aan wax heli karay, waxa la dardaarmay inamadii aan dhalay iyo marwadeydii, waxa lasii dardaarmay ragii tolkay meesha deganaa iyo hoyaday oo aan duco ka codsaday. Waxa u kaba xirtay dagaal moyee inaan wax kale usocon, waxa cagta saaray wadadii ceelka bal si` aan uga war keeno waxa halkaas kajira.

Aniga iyo Ingiriis

Waxaan socdaba gelinkii danbe ee duhurkii ayaan dul istaagay ceelkii axa aana dhugtay bay in wax ka socdaan hase ahaate cid iyo jabaq dhaqaaqda ma aysan jirin balse waxa meel il qabad ah iiga muuqday siigo cirka isku shareertay balse dan kama aanan gelin oo waxa aan u qaatay dabayl qaac ah oo kacdey.

Qawl ayaan xakama soo qabtay oo dul keenay ceelkii si aan u waraabiyo gortii aan faraskii ka waraabshay ceelka ayaan geed meel aag ah ku yiilay is iri ku indho qabso xoogaa kadibna u caraab dhulkii daraawiisheed. Wax aan hurdaba waxa halmar ka war helay iftiinka cadceeda oo iga qarsoontay, sootaan is iri aleylahe casarkii tag balse hawsha saa waa ay ka weyneed oo waxaaba i dul taagan afar nin oo fardahooda ku dul jooga. Waxa aan boodaba aan hoobto wixii i ag yaalay balse qorigaygii mid kamid ah ayaga ayaa gacanta ku haya. Inta uu i fiiriyey ayuu yiri "Makanaa baadi goobaysaa" qorigeygii ayuu kor u taagay, Waa' ayaa igu cadadaay oo waa yaabanahay halka la iiga yimid. Afar nin oo labo ay muqaal Soomaaliyeed leedahay midna cadaan yahay midna Hindi yahay ayaa afarta gees iga taagan oo si layaab leh ii eegaya.

Hade ma war kala yaala aanan ahayn inaan maxbuus noqday, ragii isoo qabtay waa ay isoo kaxeeyeen oo tog meesha ku yaal bey iga soo talaabiyeen kolba markaan wax yar soconaba gaalkii Ingiriiska ahaa yaa la hadla kuwii la socday markasay u war celiyaan, kol waxaan soo soconay waxa la i dul keenay meel ay fadhiyaan guutooyin ciidan ah oo Ingiriis uu watay, anoo amakaagsan oo layaaban tirro intaa la'eg oo cidana gormay Ingiriis meeshan kusoo daabuleen ayaa waxa ila hadlay mid kamid Somalidii gaal raaca ahayd inta uu i kaxeeyey ayuu ii geeyey gaal cadaan oo sarkaal ah meel durugsana fadhiya, dhawr su'aalood buu igu boobay, mid turjumaan ahaa ayaa kadaba hadlayey waxa una i weydiiyey; Xagee qoriga ka heshay ? Xagee ka timid ? Ma wadadkii waalnaa ba la jilbo tahay? Malaha wadaadka walaan ma Sayyidku ka waday. Aniguna hadal celin waxa ugu soo koobay inaa reer miyi ahay aan waxba la socon qorigana nimaan walaalo nahay uu leeyahay aniguna aan geela ku ilaashado. Wax la igu dul hadlaba waxa lagu amray dhawr nin oo Soomaali ahayd in la igu xiro meel ilaa inta la iga garanayo qofka aan ahay oo Ingiriis aad ayuu uga tigtoona in qof ciidankiisu jaajuuso.Waxa aan meesha iska fadhiyaba waxa aan isha la raacayey ciidanka kala duwan waxa aan ku qiyaasayey guutooyin dhan ilaa Afar kun oo nin oo kale sinji duwan kuwo waa Soomaali oo waa gaal raacyo oo waa kuwii uu Sayyidku ku sheegi jiray " Aqdaamo Ferenji"

kuwo wa madow oo waxa laga soo wada aruuriyey Afrikadii uu Ingiriis madaxa uga taagnaa, kuwo kale waa Hindi waa dhulalalkii uu ka talinayey kuwo tiro yarna waa cadaan haba ugu badnaadeen saraakiil ciidan oo dhar wada cad kuwada labisan garaadana ay u suran yihiin.

Hub iyo saaniyad waxa ay wateen ayaan eegay oo waa ciidan u diyaar ah dagaal miisaan leh. Wax aan fadhiyaba aniga ayaa hoos isku wareestay oo hadba anigoo kaxun ragaas Soomaliyeed ee gaalka ka doorbidey dadkoodii iyo diintoodii. Ma aakhiro moog baa mise waa ay dafireen xisaabtii danbe? Ma Sayyidkay saluugsan yihiin? Oo haday siyaasad ku diidan yihiin ma gaalkey siyaasad ku yeeleen? Ma xoolo raadis baa oo intii xoolo ahaaba ee Eebe weyne siiyey ma kaafin weydey? Goor aan muddo fadhiyey ayaan fiiriyey waagi inuu dilaaci rabo hase yeeshe waxaan markiiba arkay xidigii salaada subax lagu oogi jiray muuqiisa meel xooga iga xigta waxa taagnaa faraskaygii Qawl oo asagana maxbuusnimada igu wehelinayey.Meesha aan ku jiro waa ood yar ah oo lagu ooday geedka Quraca, labo nin oo mid uu hindi yahay kan kalena Soomaali yahay ayaa waardiye iga haysay gorba markay muddo dhawr saac ku dhaw ay joogaan ayay isoo fiirinayeen bal waxa aan qabanayo, midka Soomaaliga ahi markuu ii yimaado wuxu igu celceliya weli ma aadan seexan miyaa aniguse Ma hurdaa ii taal intaa gaal gacanta ugu jiro. Talo waxa aku goostay inaan meeshan iska fadhin oo aan cagaha wax ka dayo daraawiishna wargeliyo inta aanan guluf gaadmo ah afarta gees looga dhufan oo Daraawiish iyo ciidankeedii waxa ay joogeen Gumburka Cagaarweyne. Isla markiiba waxa maqlay jabaqda socodkii ragii ilaalada iga hayey intay ay ifiiriyeen iguna hubsadeen inaan weli meeshaydii ku jiro oo wax waliba sidii loogu talagalay yihiin ayey iska tageen. Markii ay saas u dhaqaaqeen oo aan gartay inay muddo iga maqnaanayaan ayaa sii tartiib ah oo jabaq lahayn ayaaan u kala qaadqaaday oodii igu oodnayd oo waxa isoo baxay meel yar aan ka bixi karo jirkaygana qodaxda durayn. Markii aan ka baxay oodii ayaan abaaray faraskaygii Qawl oo ku xiran meel aan iga fogayn, isla markiiba waxa fuulay faraskii xakamahana u qabtay oo waan la raqleeyey kadibna si xawli ah ayaan cagta u saaray jihadii aan ku qiyaastay bari oo aan maqlay inay daraawiish fadhido. Isla markiiba Waxa aan maqlay qayladii iyo dhawaaqii ciidankii ilaalada iga hayey balse dhag uma dhegin oo sidaydii baan ku baxsaday.

Aniga iyo Daraawiish

Waxaan socdaba markii ay barqadii tahay ayaan soo gaaray ciidankii Daraawiisheed qaybteedii ugu danbeesay oo u socota ciidan weynihii daraawiisheed ee Cagaarweyne. Waa isa salaanay nabad iyo nabad waxa aana ku wargiliyey in aan fariiin muhiima ah sido aana u baahanahay inaan la kulmo madaxii ciidanka watay. Waxaa la ii gudbiyey qaybtii taliska Daraawiish isla markiiba waxa isha ku dhuftay Cismaan Boos aan aad isku naqiin kol horena aan dhawr mar iska barbar dagaalamnay, aad ayuu isoo dhaweeyey oo waxa uu iga waraystay reerkii oo asaga Marwadeyda ayey isku reer ahaayeen oo aabaheed ayuu aad u garanayey. Markii aan cabaar fadhiyey ayaan bilbaabay inaan ka waramo dhamaan wixii aan soo arkay iyo ciidankii Ingiriis inta ay ahaayeen, hub waxay wateen, rag waxa la socday iyo wax walba ay ku sheekeenayeen. Gortii aan dhamaystiray wixii war aan siday ayaan intaan istaagay oo aan fiiriyey nin la oran jiray Jaamac Wadal oo meesha fadhiyey ayaan ku iri "Jaamac, Marqaati ma katahay wixii Alle igu waajib yeelay inaan idin soo gaarsiiyey"Asaguna "Haa" ayuu igu war celiyey. Cismaan Boos ayaa intuu kor u sara joogsaday yiri "Calow arrinka waa sida aad u sheegtay oo dhawr digniin oo horre ayaa noo timid mid walibana isku si ayey u dhacayeen ee hada iska naso oo caawo ayaa isku imaanaynaa haduu Ilaahay idmo ". Dabcan waxa u gartay hadalka cismaan boos in ay jireen digniino hore, meesha ayaa ka kacay oo waxaan abaaray geed meesha ku yiil oo darmo ku fidsaneed kadibna meeshaas ayaan isaga nastay.

Goor ay casarkii tahay ayaan soo indho qaaday malaha hurdadii dheerayd aan gam'ay xitaa salaadihii iima aysan istaajin. Markii aan soo tukaday ayaan u imid rag dhalinyaro ahaa oo meel agteyda ah ku shaxayey aad ayaan isku wareesanay oo sheeko ayaan galnay anoo weydiinaya meesha ay kayimadeen. Badankood waxa ay lahaayeen lahjad Bari oo waxa ay kayimaadeen Boqor Cismaan oo waa rag loo soo diray si ay u xoojiyaan Daraawiish. Barigaa Boqor Cismaan iyo Sayyidka heshiis ayey ahaayeen oo waa inta aysan maryo dhiig leh kala furan. Anagoo sidii u sheekaysanayna ayaa waxa naloogu yeeray meel barxad ah oo dhamaan ciidankii daraawiish ay joogeen. Dhamaantayo waa fadhinay marka laga reebo dhawr nin oo abaan duulayaasha ciidanka ahaa. Markii ragii ay salka dhulka ku hubsadeen ayaa waxa hadalka bilaabay Cismaan Boos waxa uuna nagu yiri " Maanta waxa joognaa dhulkeenii waxaan joognaa dhulkii awoowayaasheen ayey amxaarada ka kiciyeen waxaan joognaa dhulkii uu ilahaay ina makan siiyey, mid walboo inaga mid ah waxa uu meeshan u yimid waa u dagaalanka jidka ilahaay iyo u dagaalanka xoriyadeena,

beri waxaan wajahaynaa xoreyn aan xoreyneyno nafteena xoreyn aan xoreynayno dadkeena iyo difaacid aan difaaceeno diinteena, Halgankan waxba kagama duwana halgankii uu Axmed guray kaga xoreeyey amxaarada iyo gaalkii Bortiqiiska ahaa, dhawr boqol sanno kadib maanta waxa wajaheena cadow lamid ah kii ay wajaheen awoowayaasheen dhawr boqolsanno kahor, balse midkaan waxa uu noqon doonaa mid aysan ilaawi doonin sidii ay u ilaaween dharbaaxadii Axmed Guray". Halmar waxa is qabsaday sacbis iyo sawaxan kaas oo anan nolosheyda horay u arag, Cismaan Boos waxa uu jeediyey khudbad yar balse quluubtii ciidankii darawiisheed ku ahayd mid aad u weyn oo waxa ka dareemaysaa dhamaan ragii fadhiyey goobta halmar ayey kor u wada kaceen ayuu wada oranaya "Allahu Akbar", waxa ay ahayd daqiiqado kamid noloshayda kuwaas oo aanan ilaawi doonin in badan oo noloshayda kamid ah. Markii xamaasadii khudbada kala degtay ayaa waxa la bilaabay in la sharaxo wixii beri la oogi lahaa iyo habkii dagaalka loo geli lahaa, ciidankii daraawiisheed waxa loo kala qaybiyey dhawr urrur oo qayb walboo kamid ahaa waxa la siiyey magac iyo fardo midabkoodu isku wada ekaa. Mid walboo kamid ahna waxa madax looga dhig nin hogaan ah kasoo tilmaamaya hadba sida dagaalka loo galayo hadii dib loo guranayo iyo hadii la adkeeno garab waxa hagaya ninka hogaanka u ah qaybtaas.

Waaga horre ee subixii markii salaadii subax ay oogeen ayey Daraawiishi xabad uga bilaabeen gaalkii dhinac walba, dhawaaqa raasasta ayaa isqabsatay ilaa baaruudu ay gaadhay in saaxada dagaalka la is arki waayo. Waagii baa baryey gulufkiina wali sidii buu usocdaa wax rag la dilay oo meesha meydkooda yaal tirro maleh, waxase aad u yaab badneed markii uu waagu baryey oo sifiican la isku indho saaray ayaa waxa aragnay wax aad noo cajaa'ib galiyey taasoo ahayd in ragii Soomaaliyeed iyo qaar hindi ah oo gaal raacyo ahaa oo Ingiriiska lasoo dagaal galay lugaha silsilado labo labo la isugu xiray. Anagana uma aynan aabo yeelin oo xabada ayaa ooda oga qaadnay. Wax rag go'ay dhiigna qubtay walee cadad maleh, maxay xabadu leeftay gaal raacyo badan oo muuqaal Soomaali ah lahaa maxaa meyd iyo dhaawac is barbar yiilay dagaalkase ma istaagin, darwiish kastana wuxuu goostay in labada daarood mid lawaayo. Markii uu gulufka waqti dheer socday ayey daraawiish halmar xabadii joojisay oo waxa ninba kii ku xigay u sheegay inuu ableydiisa la dhex qaado. Nin walba qorigiisa ayuu dhabarka surtay oo ableydiisii buu intuu lasoo baxay lasoo dhex jiiray cadadkii gaalada ahaa ee meesha isugu arruursaday. Maxaa malinkaa halbowle go'ay maxaa xidid jarmay maxaa rag seef afeesan leeftay. Maxay kuwo badanoo Midab Soomaali lahaa ase mabda' gaal watay maalinkaa godkii aakhiru u hoydeen. Hade meesha soo laguma kala adkaan hadba ninka guriga leh soo guusha ma raaci jirin,

Ingiriis waa uu jabay waliba jab aad u xoogan ayaa ku rogmay goor ay duhurkii tahay ayey u kala firdhadeen sidii silsilad qubatay midba meeshii kasoo horaysay ayuu afka saaray ileen naftu waa macaan tahaye maxay rag badani malinkaas naf la cararen. Ilahaay gaaladi waa uu jabiyey waliba jab aan horay loo arag waxa igunsoo dhacday tix u tirin jiray Garaad Wiilwaal oo ahayd:-

- *Galiilyada i haysee hurdada, gama'a ii diiday*
- *Gullad iyo gacmaba waa qabnaa, lagu wax goostaaye*
- *Gaashaanka dhiiga ah warmaha, la isla gaafaayo*
- *Goormaan ku ciil bixi tashiga, yaan la gaasirine*

Ingiriis qaniimo tiro beel ah ayuu kaga tagay goobtii lagu jabiyey nin walbana waxa uu qaatay wixii uu qaadan karay malintaas, waxa kasii darnayd maydkii gaalka iyo intii lasocotay waxa markiiba cunid ku bilaabay bahalo haba ugu horeeyaan dafaha. Waxa kale oo satimaankaas isoo gaartay in ninkii Qaaje Balas ahaa uu nolol ku baxsaday kadibna uu soo tiriyey tix uu kaga waramayo wixii goobtaas ku dhacay waxa uuna tilmaamayaa siduu hawsha uu moodayey iyo siday ku noqotay waxa uuna yiri.

- *Raxan raadkiyo hawsha kamaan raali ahayne, rag baas baa I damciyey.*
- *Rabbina waa ila iraaday geel baana raadi lahaa*
- *Waxba yaan rimaydiisiyo ratigiisa rareey iyo ramagiisa kaxayne*
- *Kol haddaan ruubadayda reerihii nabad geeyey rabbiyow mahadaa*

Hadba iyo jeerba kii uu ilaahay la jiro ayaa itaal roonaane Daraawiish malinkaas guul weyn ayey gaartay waliba guul aan ka bixi doonin baalashada Soyaalka inta ay Soomali nooshahay.

Qormadani maaha mid tafotiran waana'
Ay ku jiri karaan gefaf balse diirada waxa
Aan saaray soo gudbinta Sooyaalka iyo
Dhiganaha Afka-Hooyo

Tixraaca Qoraaga :-

Cabdullaahi Cabdikaafi Cabdi
Aqoonsiga Qormada : CG
26da - Luuliyo 2023
Maalmo - Iswiidhan
abdullahikaafiabdi@gmail.com

Cabdulaahi Cabdikaafi Cabdi